17. Maalinta abaalmarinta ma taqaannaa.

وَمَآ أَدۡرَىٰكَ مَا يَوۡمُ ٱلدِّينِ ١٧

18. Haddana ma taqaannaa Maalinta abaalmarinta.

ثُمَّ مَآ أَدۡرَىٰكَ مَا يَوۡمُ ٱلدِّينِ ١٨

19. Waa Maalinta ayna u hanannin Nafna Naf kale waxba, Amarkana Maalintaas waxaa iska leh Eebe.

يَوۡمَ لَا تَمۡلِكُ نَفۡسٞ لِّنَفۡسٖ شَيۡـٔٗاۖ وَٱلۡأَمۡرُ يَوۡمَئِذٖ لِّلَّهِ ١٩

Marka Qiyaamadu dhici waxaa iman doorsoon iyo is baddallo badan, Ruux walbana wuxuu ogaan dhabta, saa daraadeed mar haddii Eebe Dadka kulmin, abuurkoodiina wanaajiyay, Caqlina siiyay, Malaa'igna u soo diray og wuxuu fali, Jidkuna Laba yahay, Janniyo Naar, Ruuxna Ruux kale wax u taraynin idan Eebe la'aantiis, amarkana dhammaan Eebe iska leeyahay miyayna habboonayn Eebe aqoonsi, wanaag falid, Xumaan ka tagid iyo u darbasho Maalintaas.
Cadullaahi Ibnu Cumar wuxuu ka wariyay Nabiga: «Ruuxii ku farxi inuu Qiyaamaha dhab u arko ha akhriyo (Marka Qorraxda la duubo), (Marka Samadu dildillacdo) iyo (marka Samadu jeexjeexanto). Al-Infidhaar (1-19).

## Suurat Al-Mudhaffifiin سُورَةُ ٱلۡمُطَفِّفِينَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu Halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya.

وَيۡلٞ لِّلۡمُطَفِّفِينَ ١

2. Waa kuwa markay miisina oofsada (dhammaystirta).

ٱلَّذِينَ إِذَا ٱكۡتَالُواْ عَلَى ٱلنَّاسِ يَسۡتَوۡفُونَ ٢

3. Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya.

وَإِذَا كَالُوهُمۡ أَو وَّزَنُوهُمۡ يُخۡسِرُونَ ٣

4. Miyayna u malaynaynin kuwaasi in loo soo bixin.

أَلَا يَظُنُّ أُوْلَٰٓئِكَ أَنَّهُم مَّبۡعُوثُونَ ٤

5. Maalin wayn darteed (Qiyaamada).

لِيَوۡمٍ عَظِيمٖ ٥

6. Maalinta Dadku u istaagi Eebaha Caalamka.

يَوۡمَ يَقُومُ ٱلنَّاسُ لِرَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٦

7. Saas ma aha ee Camalka kuwa xun wuxuu ku Qoranyahay Sijiin.

كَلَّآ إِنَّ كِتَٰبَ ٱلۡفُجَّارِ لَفِي سِجِّينٖ ٧

8. Ma taqaannaa Sijiin.

وَمَآ أَدۡرَىٰكَ مَا سِجِّينٞ ٨

9. Waa Kitaab calaamaysan.

كِتَٰبٌ مَّرْقُومٌ ٩

10. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa beeniya (xaqa).

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ١٠

11. Ee ah kuwa beeniya Maalinta abaal marinta.

ٱلَّذِينَ يُكَذِّبُونَ بِيَوْمِ ٱلدِّينِ ١١

12. Waxaana beeniya xaqa mid xad gudba oo dambiila ah.

وَمَا يُكَذِّبُ بِهِۦٓ إِلَّا كُلُّ مُعْتَدٍ أَثِيمٍ ١٢

13. Marka Quraanka lagu akhriyana yidhaahda waa warkii Dadkii hore.

إِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِ ءَايَٰتُنَا قَالَ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ١٣

Ganacsiga iyo wax kala gadashadu waa xalaal bannaan haddii Jidkeeda la mariyo, waana xaaraan xun haddii la leexiyo oo Dadka lagu boobo, Ruuxiise Eebe ka yaabi iyo hor istaaggiisa Maalinta Qiyaame waa inuu iska Jiraa Ganacsi xun, illeen Eebe Caddibaad daran yuu ugu gooddiyay kuwaase.
Nabiguna wuxuu yidhi Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Maalinta Dadku u istaagi waynanka Eebaha Caalamka Maalinta Qiyaame, Dhididkuna Dadkuu xakamayn ilaa uu ka gaadho Dhagahooda».
Waxaa wariyay Imaamu Axmad binu xambal. Al-Mudhaffifiin (1-13).

---

14. Saas ma aha ee waxaa fuulay Qalbigooda (mirdhiyay) waxay kasbanjireen oo Dambi ah.

كَلَّاۖ بَلْۜ رَانَ عَلَىٰ قُلُوبِهِم مَّا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ١٤

15. Waxaa sugan in Eebohood Maalintaas (Qiyaame) laga xijaabi.

كَلَّآ إِنَّهُمْ عَن رَّبِّهِمْ يَوْمَئِذٍ لَّمَحْجُوبُونَ ١٥

16. Markaasna ay gali Jaxiimo.

ثُمَّ إِنَّهُمْ لَصَالُوا۟ ٱلْجَحِيمِ ١٦

17. Waxaana loo odhan tani waa Naartaad ku beeninayseen Adduunka.

ثُمَّ يُقَالُ هَٰذَا ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ١٧

18. Saas xaalku ma aha ee Kitaabka iyo Camalka Dadka Wanaagsan wuxuu ku Qoranyahay Cilliyiin.

كَلَّآ إِنَّ كِتَٰبَ ٱلْأَبْرَارِ لَفِى عِلِّيِّينَ ١٨

19. Cilliyiin ma taqaannaa.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا عِلِّيُّونَ ١٩

20. Waa Kitaab la Calaameeyay (oo Dadka fiican magaciisa lagu qoro .

كِتَٰبٌ مَّرْقُومٌ ٢٠

21. Waxaana Gacanta ku haya Malaa'ig Eebe u dhaw.

يَشْهَدُهُ ٱلْمُقَرَّبُونَ ٢١

22. Kuwa wanaagsan waxay gali Naciima (Janno).

إِنَّ ٱلْأَبْرَارَ لَفِى نَعِيمٍ ٢٢

23. (Maalinta Qiyaamana) Sariiro yay ku dangiigsanaan oy wax ka daawan.

عَلَى ٱلْأَرَآئِكِ يَنظُرُونَ ٢٣

24. Wajigooda yaanad ka garan Nicmada.

تَعۡرِفُ فِي وُجُوهِهِمۡ نَضۡرَةَ ٱلنَّعِيمِ ٢٤

25. Waxaana laga waraabin cabbid la dhawray (oo macaan).

يُسۡقَوۡنَ مِن رَّحِيقٖ مَّخۡتُومٍ ٢٥

26. Waxaana lagu khatimaa Miski iyo udgoon, ee Arrintaas ha u tartameen Tartamayaashu.

خِتَٰمُهُۥ مِسۡكٞۚ وَفِي ذَٰلِكَ فَلۡيَتَنَافَسِ ٱلۡمُتَنَٰفِسُونَ ٢٦

27. Waxaana lagu dheehi Cabbitaan sare.

وَمِزَاجُهُۥ مِن تَسۡنِيمٍ ٢٧

28. Waa Il ay ka cabbaan kuwa Eebe u dhaw.

عَيۡنٗا يَشۡرَبُ بِهَا ٱلۡمُقَرَّبُونَ ٢٨

Dambigu wuxuu halleeyaa quluubta Dadka, wuxuuna sabab u noqdaa Eebe oo iska xijaaba Ruuxaas, sidaa oo kale wuxuu u hoggaamiyaa Dadka Naarta iyo Caddibaad
Dadkase Eeba addeeca waxay ku raaxaysan Janno iyo cabbid macaan oo xalaal ah iyo aragga Eebahood, waana xaal loo orotamo loona dadaalo. Al-Mudhaffifiin (14-28).

---

29. Kuwii Dambaabay (Gaaloobay) waxay ahaayeen kuwa ku qosla kuwii xaqa rumeeyay.

إِنَّ ٱلَّذِينَ أَجۡرَمُواْ كَانُواْ مِنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ يَضۡحَكُونَ ٢٩

30. Haday maraanna way xaqirijireen.

وَإِذَا مَرُّواْ بِهِمۡ يَتَغَامَزُونَ ٣٠

31. Markay Guryahoodii u noqdaanna (gaaladu) waxay noqonjireen iyagoo isla Wayn (oo raaxaysan)

وَإِذَا ٱنقَلَبُوٓاْ إِلَىٰٓ أَهۡلِهِمُ ٱنقَلَبُواْ فَكِهِينَ ٣١

32. Markay arkaan Mu‘miniintana waxay dhahaan kuwaasi waa dhunsanyihiin.

وَإِذَا رَأَوۡهُمۡ قَالُوٓاْ إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ لَضَآلُّونَ ٣٢

33. Loomana dirin inay ilaaliyaan Mu‘miniinta.

وَمَآ أُرۡسِلُواْ عَلَيۡهِمۡ حَٰفِظِينَ ٣٣

34. Maalinta (qiyaame) kuwa rumeeyay xaqa waxay ku qosli gaalada.

فَٱلۡيَوۡمَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنَ ٱلۡكُفَّارِ يَضۡحَكُونَ ٣٤

35. Sariiro korkood yayna wax ka daawan.

عَلَى ٱلۡأَرَآئِكِ يَنظُرُونَ ٣٥

36. Miyaan laga abaalmarinnin Gaalada waxay falayeen. (waa laga abaalmariyay).

هَلۡ ثُوِّبَ ٱلۡكُفَّارُ مَا كَانُواْ يَفۡعَلُونَ ٣٦

Isla waynida iyo kibirka iyo Dadka xaqa rumeeyay oo la xaqiro lana liido waxay dhaxalsiin dulli caddibaad Aakhiro iyo Adduunba, waana shaqada iyo falka kuwa xunxun een Caqliga lahayn.
Eeg waxay ku dambeeyeen Ree-Caad, Fircoon, Qoomkii Nabi Nuux, Qureeshtii ree Makaad iyo cid kasta oo isla waynaatay xadna-gudubtay, saa darteed waa in laga digtoonaado falalkaas oo kale, wanaaggana la raaco, illeen waa layska abaal-marin wixii la falaye. Al-Mudhaffifiin (29-36).